



## 7 ka socda PPS ayaa ka helay Lifetime Achievement Awards sharfidda Dr. Martin Luther King Jr.

Toddobo xubnood oo bulshada ka tirsan oo xiriir la leh Dugsiyadda Dadweynaha Portland ayaa lagu sharfay Lifetime Achievement Award Isniinii iyadoo qayb ka ah dhacdada Sharfidda sanadlaha ee 35<sup>aad</sup> ee Dr. Martin Luther King Jr oo ka dhacday Highland Christian Center.

Dhacdada maalinta oo dhan socotay dad ayaa ka hadlay oo masrixiyad ayaa lagu soo bandhigay waxayna daarnayd abaalmarinaha Lifetime. Dadka sanadkan lagu maamuusay waxa kamid ah:

- **Mercedes Muñoz**, oo ah macallin waxbarashada gaarka ah ee dugsiga sare ee Franklin High School oo dhawaan [loo magacaabay Macallinka Sanadka ee Oregon](#).
- **Tamala Newsome**, oo ka shaqeynaysay PPS muddo 28 sano ah, oo ay kujirto 21 ugu dambeeyey oo ay ahayd maamulaha dugsiga hoose ee John Ball Elementary School, kaasoo noqday dugsiga hoose ee Rosa Parks Elementary School. Waxay hawlgab noqotay sanadkii hore.
- **Karen Barker**, oo 33 sano ahayd macallin dugsi hoose ee PPS, isla markaana ku soo shaqaysay maamule barnaamijka dugsiga sare ee Maurice Lucas Foundation.
- **Margaret Peoples**, oo macallin ahaan uga soo shaqaysay meelaynta gaarka ah ee Waaxda PPS ee Kulliyadda iyo Diyaargarowga Xirfadda muddo 19 sano ah, oo diiradda saareysa barnaamijka Gear Up oo ardayda u diyaariya kulliyadda.
- **Major Michael Jones**, kaasoo kaaliye u ahaa maamulaha dugsiga sare ee Jackson High School ee PPS 1970-nadii door weynna ka ciyaaray dadaalada degmada ee isdhexgalka dugsiyada. Wuxuu ka qalinjabiyay dugsiga sare ee Grant High School.
- **Donald Whisler Wolfe** (posthumous), kaasi oo lahaa xirfad muddo dheer oo sharfan oo uu ahaa macallin muusiga dhiga kana soo dhigay muusiga choral dhawr dugsi, sida dugsiyada sare ee Cleveland iyo Jefferson ee PPS.
- **Pedro Anglada Cordero**, kaasi oo soo noqday lafaguraha xogta imaanshaha ee PPS kahor intii aanu u guurin shaqo sharaf leh oo ah inuu ka noqday adeege bulsho Portland iyo aagagga ku xeeran.

Dhacdada ayaa sidoo kale lagu soo bandhigay ardayda jilayaasha PPS, oo ay ku jiraan Barnaamijka Muusiga Bravo ee dugsiga hoose ee Sitton Elementary, Faubion K-8, Jefferson Dancers iyo dugsiga dhexe Beaumont Middle School, iyo khudbad ay jeedisay Nicole Watson, oo ah macallimad dugsiga Grant High oo ku hadashay magaca Ururka Macallimiinta Portland. PPS waxay ahayd mid ka mid ah maalgaliyeyaasha dhacdada.

[Hoos ka daawo sawirro dhammaystiran oo ku saabsan dhacdada](#)

Dhacdooyin kale oo la xiriira PPS ayaa lala qabtay tan Maalinta Dr. Martin Luther King Day maalintii Isniinta:

**RIDE:** Qaybtii 4-<sup>aad</sup> ee sanadlaha ah ee 'RIDE', ee Racial (Isirka), Identity (Aqoonsiga), Development (Horumarinta), Empowerment (Xoojinta), waxay iskugu keentay 100 arday oo dugsiaga dhexe iyo sare ah Blessed Temple Community Church si ay uga qaybgalaan wada sheekaysi geesinimo leh oo kusaaban isirka iyo sinnaanta.

Dhacdada waxaa martigaliyey DoPE (Dreaming of Potential Excellence), oo ah hay'ad ay aasaastay macallimad dugsiaga Vernon K-8 School, Paula Dennis si ay ugu xirto ardayda aan caddaanka ahayn dadka muddakarka ah ee kujira meelaha ay ardaydani xiiseeyaan iyo dadka kale ee tusaalaha ah ee bulshadu leedahay. Julie Palmer, oo ah xeeldheere waxbariseed ee dugsiaga sare ee Franklin High School, ayaa la martigalisay dhacdada Zinnia Un, oo ka ah iskuduwe Sinnaanta Degmo Dugsiyeedka Tigard-Tualatin.

[Hoos ka daawo sawirrada ku saabsan dhacdada](#)

**Grow halkan Vestal:** Ardayda, shaqaalaha iyo qoyska ka socda dugsiaga hoose ee Vestal Elementary iyo Akadeemiyada ACCESS ayaa ku soo biiray shaqaalaha ka socda Grow Portland si ay u nadiifiyaan oo kor ugu qaadaan beerta dugsiaga.

Grow Portland waxay gacan ka gaysataa abuurista iyo taageerista beeraha dugsiyada taasoo ah qaab ay kaga caawinayso bulshadu inay ku xiranto adduunka dabiiciga iyo cuntada caafimaadka leh. Ka sokow Vestal, Grow waxay la shaqaysaa siddeed kale oo dugsiyada PPS ah sida Chief Joseph, Rigler, Beverly Cleary, Laurelhurst, Atkinson, Grout, Creative Science iyo Harrison Park.

[Hoos ka daawo sawirrada ku saabsan dhacdada](#)